**HEALTHY BIRTH DAY, INC.**

**(*oo sidoo kale loo yaqaano* COUNT THE KICKS)**

**SHURUUDAHA ISTICMAALKA**

Dhaqangalay Luulyo 9, 2018.

## Gogoldhiga

Himilada shirkadda aan macaash-doonka ahayn ee Healthy Birth Day, Inc. ee ku dhisan xeerka 501(c)(3) ayaa ah in si weyn loo dhimo tirada dhallaanka shinkiisa gaaray ee dhinta iyadoo loo marayo ololaha wacyigelinta caafimaadka dadweynaha ee Count the Kicks. Shirkadda Count the Kicks waxay baraan dadka waalidiinta noqon doona muhiimadda ay leedahay, iyo habka, loola socdo dhaqdhaqaaqa uurjiifka ku jira saddexda bilood ee uurka ugu dambaysa. Haweenka uurka leh waxay awood u leeyihiin inay dhallaankooda badbaadiyaan iyagoo baranaya qaababka ay u dhaqdhaqaaqaan dhallaankooda iyo in ay dareemaan inay awoodda ay u leeyihiin inay sheegaan dhakhtarkooda haddii ay isbeddel arkaan. Shuruudahan Isticmaalka ee soo socda ayaa hagi doona isdhexgalka aad la samayso App-ka Count the Kicks.

## Oggolaanshaha Shuruudaha Isticmaalka

Shuruudaha isticmaalka waxaa ku heshiiya Adiga iyo Shirkadda, danwadaagteena iyo shirkadaha na hoos yimaada (“**Shirkadda**” ama “**innaga**” ama “**annaga**”). Shuruudaha iyo xaaladaha soo socda, oo ay wehliyaan dokumeentiyo kasta oo ay si cad ugu adeegsadaan tixraac ahaan (wadajir ahaan, "**Shuruudahan Isticmaalka**"), ayaa haga inaad gasho iyo isticmaasho app-ka Count the Kicks (“**App-kayaga**”) oo ay ku jiraan dhigaalo kasta, habka loo adeegsado iyo adeegyada la bixiyo ama loo maro app-ka Count the Kicks App ama Mareegta, www.countthekicks.org.

Fadlan si taxadar leh u akhri Shuruudaha Isticmaalka kahor inta aadan bilaabin inaad App-ka isticmaasho. Markaad adeegsato ama gujiso App-ka si aad u aqbasho ama u oggolaato Shuruudaha Isticmaalka marka ikhtiyaarkan aad heli karto, waxaad aqbashay oo aad oggolaatay inuu ku xakameeyo oo aad u hoggaansanto Shuruudaha Isticmaalka iyo Siyaasadayada Xog-dhowrista, ee halkan laga helo, oo loo soo raaciyay dokumeentigan tixraac ahaan. Haddii aadan rabin inaad oggolaato Shuruudaha Isticmaalka ama Siyaasadda Xog-dhowrista, waa inaadan galin ama isticmaalin App-ka.

App-kan ayaa la bixiyaa oo ay heli karaan isticmaaleyaasha da'doodu tahay 16 sano ama wixii ka weyn. Markaad isticmaasho App-kan, waxaad matalaysaa oo aad dammaanad qaadaysaa inaad buuxiso dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka ee kor lagu xusay. Haddii aad buuxin karin shuruudahan oo dhan, waa inaadan gelin ama isticmaalin App-ka.

Ujeeddooyinka Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud awgood, Xakameeyaha Xogta iyo Wakiilka Midowga Yurub (EU) waa shirkadda (Quality Consulting, Inc., QCI) ee ku taala West Des Moines, Iowa, taasoo macluumaadkeeda xiriirka laga heli karo qaybta hoose.

Bilaw ilaa dhammaad Shuruudahan Isticmaalka waxaanu adeegsadan doonaa kelmada “ **Dalalka La Cayimay**” si aanu u tixraacno wadamada ku bahoobay Midowga Yurub (EU), Aagga Dhaqaalaha ee Yurub (EEA), iyo Iswiisarland. Haddii aad deggan tahay Dalalka La Cayimay, waxaad leedahay dhawr xuquuqo oo aanu doonayno inaad ka warqabto. Xuquuqahan waa la tilmaami doonaa iyadoo la tixraacayo Dalalka La Cayimay haddii la dabaqi karo.

**Isbeddellada Shuruudaha Isticmaalka**

Dib-u-eegis iyo cusbooneysiin ayaan ku samayn karnaa Shuruudaha Isticmaalka wakhti-ka-wakhti annagoo ka gaarayna go'aan gaar ah. Isbeddelada oo dhan ayaa isla markiiba dhaqangal noqon doona markaan soo dhejino oo ku dabaqno gelitaanka iyo isticmaalka Mareegta oo dhan wixii intaasi ka dambeeya. Haddii aan wax ka beddelno Shuruudaha Isticmaalka, waan ku ogeysiin doonaa innagoo u marayno Mareegtayada iyo App-kayaga

#2970591 v.2

App, ama habab kale, si laguu siiyo fursad aad dib ugu eegto isbeddelada kahor inta aysan dhaqangal noqon.

Marka aad si joogto ah u adeegsato App-ka kadib marka la soo dhejiyo Shuruudaha Isticmaalka ee dib loo eegay waxay ka dhigan tahay inaad aqbashay oo aad oggolaatay isbeddellada. Waxaa lagaa filayaa inaad soo booqato boggan wakhti-ka-wakhti si aad uga warqabto wixii isbeddelo ah, maadaama uu adiga ku khuseeyo.

**Waajibaadyada**

Waa kuwan qaar ka mid ah ballanqaadyada aad inoo samayso marka aad oggolaato Shuruudahan Isticmaalka:

**Akoonkaaga**

Haddii aad doorato inaad akoon ka samaysato App-kayaga, waxaad oggolaanaysaa waxyaabahan soo socda:

- Inaad qarsoodi ka dhigi doonto fure-sireedkaaga.
- Inaad la wadaagi doonin akoonka qof kale oo aad raaci doonto shuruucda, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn Shuruudahan Isticmaalka iyo Siyaasaddayada Xog-dhowrista, iyo sharciga.
- Inaad mas'uul ka tahay wax kasta oo dhaca ee loo maro Akoonkaaga haddii aadan xirin ama aadan soo sheegin si xun u isticmaalka.
- Inaad qirto in macluumaadka lagu dhex bixiyo app-ka laga leeyahay oo kaliya ujeeddooyin waxbarasho oo aan loogu talagalin ogaansho ama daawayn cudur. Waa in loo isticmaalo macluumaadkan sida uu qabo bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

**Ogeysiinada iyo Fariimaha**

Markaad gasho App-kayaga, waxaad oggolaanaysaa waxyaabaha soo socda:

- Waxaad oggolaanaysaa inaan ku siino ogeysiino iyo farriimo khuseeya app-kayaga ama adeegyadayada. Haddii macluumaadka xiriirka aad iska beddeshay, waxaa laga yaabaa inaadan helin ogeysiinada muhiimka ah.
- Waxaad oggolaanaysaa inaan kuu siin doono ogeysiino iyo farriimo qaababkan soo socda: (1) inaan kaaga soo dirno App-ka gudahiisa, ama (2) inaan kuugu soo dirno macluumaadka xiriirka ee aad na siiso (tusaale, iimaylka, lambarka telefoonka, cinwaanka guriga). Waxaad oggolaanaysaa inaad cusbooneysiiso macluumaadka xiriirkaga.
- Waxaad oggolaanaysaa in shirkadda Healthy Birth Day, Inc., oo ujeeddadeedu tahay in laga hortago dhimashada dhallaanka shinkiisu buuxsamay lana badbaadiyo dhallaanka, ay u isticmaali

karto xogtaada cilmi-baaris, qiimeyno ama daraasado iyadoo ujeeddada laga leeyahay ay tahay horumarinta barnaamijyadeena iyo wanaajinta wax-ku-oolnimadeeda.

**Xuquuqaha iyo Xaddidaadaha**

**Adiga ayaa leh macluumaadkaaga**

Adiga ayaa leh dhammaan dhigaalada, ra'yi-celinta, iyo macluumaadka gaarka ah ee aad na siiso. Waanu ixtiraami doonaa dookhyada aad samayso ee khuseeya sida aanu u isticmaalno macluumaadkaaga. Adiga iyo Shirkadda ayaa isku waafaqaya in haddii macluumaadkaaga ay ku jiraan wax xog gaar ah, ay hoos iman doonaan Siyaasaddayada Xog-dhowrista.
Adiga iyo Shirkadda ayaa isku waafaqaya inaan geli karno, keydin karno, farsamayn karno oo isticmaali karno macluumaad kasta iyo xog kasta oo gaar ah ee aad u bixiso si waafaqsan shuruudaha Siyaasaddayada Xog-dhowrista.

Waxaad oggolaanaaysaa inaad bixiso oo kliya macluumaadka aan jebinin sharciga iyo midkoona xuquuqaha uu qofku leeyahay (oo ay ku jiraan xuquuqaha hantida garaadka). Waxaad sidoo kale oggolaanaysaa in macluumaadka aad bixiso uu noqon doono mid run ah. Shirkadda waxaa laga yaabaa in sharcigu uga baahdo inay meesha ka saarto macluumaadka qaarkiis.

**Dhigaalada, Goobaha iyo App-yada Kale**

Markaad isticmaalayso App-kayaga ama adeegyadayada, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto dhigaalo ama macluumaad khaldan, aan dhammaystirnayn, la daahiyay, marin habaabin ah, sharci-darro ah, aflagaado ah ama sida kale waxyeello leh. Mar walba kama hortagi karno si xun u isticmaalkan lagu sameeyo adeegyadeena, waxaadna oggolaanaysaa in aynu mas'uul ka ahayn si xun u isticmaalkaasi.

Adiga ayaa mas'uul ka ah go'aan ka gaarista inaad gasho ama isticmaasho app-ka ama mareegaha qolyo saddexaad ee laga yaabo inay ku xidhmaan mareegahayaga ama adeegyadayada. Haddii aad u oggolaato app-ka ama mareegta qolyo saddexaad inay xaqiijiyaan akoonkaaga, app-kaas ama mareegtaasi waxay awoodi doonaan inay helaan macluumaadka adiga ku khuseeya. Apps-yada iyo mareegaha qolyaha saddexaad ayaa leh shuruudo sharciyeed iyo siyaasadaha xog-dhowrista oo iyaga u gaar ah, waxaana laga yaabaa inaad cid kale siiso oggolaansho ay ugu isticmaalaan macluumaadkaaga si aynu innaga u isticmaali lahayn. Marka laga reebo waqtiyada xaddidan ee uu u baahan karo sharciga lagu dabaqi karo, Shirkaddu mas'uul kama ahan mareegahan iyo app-yadan kale—wixii ka dhasha isticmaalkooda adiga ayaa mas'uul ka ah. Fadlan eeg Siyaasaddayada Xog-dhowrista.

**Xaddidaadaha**

Shirkaddu waxay xaq u leedahay inay xaddido inaad isticmaasho App-kayaga ama adeegyadayada, oo ay ku jirto inta jeer ee aad geli karto. Shirkaddu waxay xaq u leedahay inay xaddiddo, hakiso, ama joojiso inuu shaqeeyo Akoonkaaga haddii ay Shirkaddu aaminsan tahay inaad jebisay Shuruudaha Isticmaalka, Siyaasaddayada Xog-dhowrista, ama sharciga ama aad si xun u isticmaalayso Mareegtayada ama adeegyadayada.

**Xuquuqaha Hantida Garaadka**

Shirkadda ayay u sugnaatay xuquuqdeeda lahaanshaha hantida garaadka oo dhan ee App-kayaga iyo adeegyadayada. Isticmaalida App-ka ama adeegyada kama dhigna inaad iska leedahay adeegyadayada ama dhigaalada ama macluumaadka laga heli karo App-kayaga ama adeegyadayada. Calaamadaha ganacsi iyo summadaha ganacsi ee la isticmaalo ee ku jira App-ka ama adeegyada waa calaamadaha ganacsi ee mulkiileyaasha iska leh.

**Hawl-socodsiinta Tooska ah**

Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadka iyo xogta aad bixiso oo aan adiga kaa helno inaan ku siino talooyin khuseeya isticmaalka akoonkaaga, dhigaalada iyo sifooyinka laga yaabo inay ku anficaan adiga. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno xogta iyo macluumaadka adiga kugu saabsan inaan talo-bixin kaa siino baddeecadaha aad gadan karto. Inuu macluumaadkaagu yahay midka saxda ah oo ugu dambeeyay ayaa naga caawinaya inaan ka dhigno talooyinkan kuwo sax ah oo kugu habboon.

**Afeefta iyo Xaddidaada Mas'uuliyadeed**

**Ma Jirto Wax Damaanad ah**

ILAA IYO INTA UU SHARCIGU OGGOLYAHAY, SHIRKADDA IYO DANWADAAGTEEDA (IYO QOLYAHA AY SHIRKADDU KALA SHAQAYSO BIXINTA ADEEGYADA) (A) WAXAY KA AFEEFANAYAN DHAMMAAN DAMMAANADAHA IYO MATALAADA (TUS. DAMMAANADAHA GANACSI-GALKA, KU HABBOONAANTA UJEEDDO GAAR AH, SAX AHAANSHAHA XOGTA, IYO KU XADGUDUB LA'AANTA); (B) MA DAMANAD QAADAYAAN IN ADEEGYADA AY U SOCON DOONAA SI AAN KALA JOOGSI AMA CILLAD LAHAYN, IYO (C) MA U BIXIN DOONAAN ADEEGGA (OO AY KU JIRAAN DHIGAALADA IYO MACLUUMAADKA) ISLA “SIDA AY YIHIIN” IYO “HADBA SIDA LOO HELI KARO”.

SHARCIYADA QAAR AYAA MA OGGOLA AFEEFO GAAR AH, MARKA QAAR KA MID AH AMA DHAMMAAN AFEEFAHAN AYAA LAGA YAABAA INAAN LAGUGU DABAQI KARIN.

**Ka-reebitaanka Mas'uuliyadda**

ILAA IYO INTA UU SHARCIGU OGGOLYAHAY (IYO ILAA AY SHIRKADDU KA GASHO HESHIIS QORAAL AH OO GAAR AH OO BURINAYA HESHIISKAN), SHIRKADDA IYO DANWADAAGTEEDA (IYO QOLYAHA AY SHIRKADDU KALA SHAQAYSO BIXINTA ADEEGYADA) MAS'UUL KAMA AHAN WAXYEELLADA DADBAN, KEDISKA AH, KHAASKA AH, CAWAAQIIBTA AMA CIQAABTA AH EE IDIN SOO GAARTA ADIGA IYO DADKA KALE AMA LUMITAANKA XOGTA, FURSADAHA, SUMCADA, FAA'IIDADA AMA DAKHLIGA, EE LA XIRIIRA ADEEGYADA (TUS. KELMADAHA GAFKA AH AMA MEEL-KA-DHACA AH, WAQTIGA HAWSHU JIRIN AMA KHASAARAHA, ISTICMAALKA, AMA ISBEDDELKA, KU YIMAADA MACLUUMAADKAAGA AMA DHIGAALADAADA).

MARNABA MAS'UULIYADDA SHIRKADDA IYO DANWADAAGTEEDA (IYO QOLYAHA SHIRKADDA KALA SHAQEYSO BIXINTA ADEEGYADA) MA DHAAFSANAAN DOONTO, MARKA LA ISU GEEYO QAANSHEEGASHOOYINKA OO DHAN, CADDAD LACAGEED OO MIDKOOD KA YAR (A) SHAN JIBBAAR KHIDMADA BILLAHA AMA SANNADLAHA EE UGU DAMBYSAY OO AAD ADEEGGA LACAG KA BIXISAY, HADDIIBA AY JIRTO, AMA (B) $1000 USD.

XADDIDAADA MAS'UULIYADA AYAA AASAAS U AH GORGORTANKA IDINKA DHEXEEYA ADIGA IYO SHIRKADDA WAXAYNA KHUSAYSAA DHAMMAAN QAANSHEEGASHOOYINKA MAS'UULIYADEED (TUS. DAMMAANADA, DACWADA MADANIGA AH, DAYACA, HESHIISKA, SHARCIGA) IYO XITAA HADDII SHIRKADDA AMA DANWADAAGTOODA LOO SHEEGAY WAXYEELLO KASTA, IYO XITAA HADDII XALALKANI LAGU FASHILMAY UJEEDDADA LAGA LAHAA.

SHARCIYADDA QAAR MA OGGOLA XADDIDAADA AMA KA-DHAAFITAANKA MAS'UULIYADDA, MARKA XADDIDAADAHAAS LAMA DABAQI KARO.

**Shaqo-ka-joojinta**

Adiga iyo Shirkaddaba waxaad joojin kartaan heshiiska aad wada gasheen ee hoos yimaada Shuruudaha Isticmaalka wakhti kasta marka ogeysiis midba midka kale uu siiyo. Marka la joojiyo, waxaad luminaysaa xaqa aad u leedahay inaad hesho ama isticmaasho adeegyada. Waxyaabaha soo socda ayaa ka badbaadi doona in la joojiyo:

- Xuquuqaha aynu u leenahay inaan isticmaalno oo shaacino ra'yi-celintaada;
- Qaybaha soo socda ee Shuruudaha Isticmaalka: Afeefta iyo Xaddidaada Masuuliyadeed; Sharciga Haga Heshiiska iyo Xallinta Khilaafaadka; iyo Shuruudaha Guud;
- Lacag kasta oo lagu leeyahay labada dhinac kahor inta aan la joojin heshiiska waa lagu sii lahaan doonaa kadib joojinta heshiiska.

Haddii aad samaysatay Akoon, waad nala soo xiriiri kartaa adigoo isticmaalaya Macluumaadkeena Xiriirka ee hoos ku qoran si aad u xidho Akoonkaaga.

**Sharciga Haga Heshiiska iyo Xallinta Khilaafaadka**

Marka ay timaado dhacdo aan la filayn oo horseeda khilaaf sharci ah, Shirkadda iyo adiga ayaa isku waafaqi doontaan in lagu xalliyo maxkamadaha gobolka Iowa iyadoo la adeegsanayo sharciga Iowa, ama maxkamadaha Mareykanka iyagoo adeegsanaya sharciga Mareykanka.

**Shuruudaha Guud**

Haddii maxkamad awood u leh Shuruudaha Isticmaalka ay u aragto qayb ka mid ah shuruudaha in la dhaqangelin karin, adiga iyo innaga ayaa isku waafaqi doona in maxkamaddu ay wax ka beddesho shuruudaha si ay qaybtaasi uga dhigto mid la dhaqangelin/fulin karo iyadoo weli la gaarayo ujeeddada laga leeyahay. Haddii maxkamaddu ay taasi samayn kari weydo, adiga iyo inagga ayaa isku waafaqi doona in aanu maxkamadda weydiisano inay meesha ka saarto qaybtaas aan la dhaqangelin/fulin karin oo ay weli dhaqangeliso inta hadhay ee Shuruudaha Isticmaalka.

Haddii aynu tallaabo qaadin si aan u dhaqangelino jebinta Shuruudaha Isticmaalka, taasi macnaheedu ma ahan in aynu ka tanaasulnay xaqa aynu u lahayn inaan fulino Shuruudaha Isticmaalka. Ma laga yaabaa inaadan u xilsaaran ama u wareejin xuquuqaha aad leedahay ee hoos yimaada Shuruudaha Isticmaalka qofna iyadoo aan la innaga haysan wax oggolaansho ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaad oggolaanaysaa in aan u wareejin karno xuquuqahaaga hoos yimaada Shuruudaha Isticmaalka danwadaagtayada ama qolada iibsata Shirkadda iyadoo aan lagaa haysan wax oggolaansho ah. Ma jiraan sama-dheefsadeyaal qolo saddexaad ah oo ka faa'iidsanaya Shuruudahan Isticmaalka.

Waxaad oggolaatay in qaabka keliya ee aad nagu siin karto ogeysiis sharci ah ay tahay cinwaanada lagu bixiyay qeybta “Macluumaadka Xiriirka” ee hoose.

**Macluumaadka Xiriirka**

Dhammaan su'aalaha, faallooyinka iyo codsiyada khuseeya Shuruudaha Isticmaalka waa in lagu soo hagaajiyaa:

Healthy Birth Day, Inc.
Attn: CEO
1820 N.W 118th St., Clive, IA 50325 USA
515-650-8685
info@countthekicks.org

Ujeeddooyinka Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud awgood, dadka deggan Dalalka La Cayimay waxay la xiriiri karaan Wakiilkayaga Midowga Yurub (EU) si ay ugu hagaajiyaan dhammaan su'aalaha, faallooyinka iyo codsiyada khuseeya Shuruudaha Isticmaalka:

Ascenditure, Ltd.
Attn: Count the Kicks App Developer
300 W. Arroyo St., Reno NV 89509
775-737-1988
Chris@ascenditure.co